Somali

Leicester City Council

# Kullanka Ilmo Badbaadinta

## Tilmaan-bixiye loogu tallogaley Waalidiinta iyo Daryeeleyaasha

**Child Protection Conference**

**A guide for Parents and Carers**

**Waa maxay Kullan Ilmo Badbaadin?**

Kullan Ilmo Badbaadin waa kulan lagu wadaagayo waxa si wacan u shaqeynaya iyo waxa aan ka welwelsan nahay iyo go'aaminta waxa xiga ee ay tahay inay dhacaan.

**Go'aanka keliyah ee uu kulanka lagu gaari karo** waa cunuga/ilmaha ma loo dejiyo qorshe lagu badbaadiyo mise maya.

**Yaa kullankan loogu tallogaley?**

Waalidiinta mar walba waa lagu marti-qaadaa kullanka Ilmo Badbaadinta cunugooda quseeya, xitaa aysan isku meel ku wada nooleyn. Social Worker-ka cunugaaga mar walba Kullanka Ilmo Badbaadinta wuu imaanayaa.

Dadka kale ee ay dhici karto in la marti-qaado waxaa ka mid ahaan kara:

- Macalin
- Shaqaale caafimaad sida Booqde Caafimaad, Kalkaaliye Iskuul, Takhtar GP ah, Takhtar Isbitaal iwm
- Booliis
- Sarkaal Kuruud-bixin (Probation) ama mid Dhalinyarada faldenbiyedka ku kaca (Youth Offending) qaabilsan
- Dad kale oo nolosha cunugaaga u muhiim ah sida la Talliye Connexions ka tirsan, Shaqaale Dhallinyaro iwm

Qof kasta oo ka soo qeybgalka kullanka lagu marti-qaado in uu warbixin soo qoro ayaa la weyndiisan doonaa.

**Qof kale ma soo wadan karaa?**

Haddii aad doonto waa aad soo wadan kartaa saaxiib, mid shabakada qoyskaaga ka mid ah, xigto ama garyaqaan ah, laakiin qofkaas waa inuu fahmaa in uusan meesha u imaan inuu ra'yi ka dhiibto haddii aan arrinta wax laga weydiin.

Haddii aad turjumaan ama wax callaamadeeye u baahan tahay Social Worker-ka ilmahaaga baa qof ku haboon diyaarinaya.

**Ka waran haddii aanan ka soo qeybgeli karin?**

Mar walba waxa aan ku dadaalna in kullanada la qabto waqti waalidka u haboon oo fikradihiina aad bay muhiim u yihiin. Dadka kullanka u jooga inay adiga iyo cugaaga idin kaalmeeyaan ogaanshaha waxa wax kuu taraya bay u baahan yihiin. Social Worker-ka ilmahaaga ayaa kugu kaalmeyn doona diyaarinta waxa loo baahan yahay sida gaadiidka ama ilmo kuu ilaalinta kuu suurtogelin karta in aad goobta kulanka timaadid.

Haddii aad dareento in aadan kulanka imaan karin sababtuna tahay inay sii kordhineyso qatarta adiga ama caruurtaada ku soo wajahan, waxa aan ka fikiri karnaa helitaanka siyaabo lagu hubsanayo in uu qof walba ra'yogiisa si nabad ah u dhiiban karo. Haddii ay aad kuugu adkaato ka soo qeybgalka kullanka waa in aad Social Worker-ka ilmahaaga kala hadashaa helitaanka siyaabo kale oo dadka kullanka jooga lagu ogeysiinayo ra'yga aad arrintan ka qabto.

**<u>Qorshaha Ilmo Adeeg U Baahan (A Child in Need Plan)</u>**

Mararka qaar xubnaha Kullanka Ilmo Badbaadinta ayaa go'aamin doona in uusan cunugaaga halis daran ku jirin uuna u baahneyn uun in qorshe ilmo badbaadin ah loo dejiyo.

Waxaa dhici karta in aad adiga iyo qoyskaaga kaalmo iyo taageero u baahan tihiin xitaa haddii aadan dhib halis ugu jirin; marka ay tan dhacdo ayey xubnaha kullanka dejiyaan qorshe ilmo adeeg u baahan loogu tallogalay.

Ka waran haddii aanan go'aanka waafaqsaneyn?

Haddii aadan ku faraxsaneyn go'aanka uu kullanka gaarey, markaa waxa aad aad xaq u leedahay in aad rafcaan ka qaadatid, guddoomiyaha ayaana kuu sharxi doona sida tan loo sameeyo. Haddii aad rabtid in aad ka dacwooto ama fikrad ka dhiibato sida kullanka loo maamuley, ama wax ku saabsan anshaxa shaqaalaha hawsha wada, waxa aad codsan kartaa buug-yaraha Dacwadaha iyo Fikrad Dhiibashada oo ku siinaya faahfaahinta waxa ay tahay inaad sameyso.

**<u>Ka waran haddii aanan go'aanka waafaqsaneyn?</u>**

Haddii aadan ku faraxsaneyn go'aanka uu kullanka gaarey, markaa waxa aad aad xaq u leedahay in aad rafcaan ka qaadatid, guddoomiyaha ayaana kuu sharxi doona sida tan loo sameeyo. Haddii aad rabtid in aad ka dacwooto ama fikrad ka dhiibato sida kullanka loo maamuley, ama wax ku saabsan anshaxa shaqaalaha hawsha wada, waxa aad codsan kartaa buug-yaraha Dacwadaha iyo Fikrad Dhiibashada oo ku siinaya faahfaahinta waxa ay tahay inaad sameyso.

**<u>Qorshaha Ilmo Adeeg U Baahan</u>**

Haddii uu go'aanka yahay in Qorshe Ilmo Adeeg U Baahan la dejiyo, markaa waxa uu qorshaha sheegi doonaa:

- Waxa ay Daryeelka Bulshada Caruurta iyo wakaaladaha kale qabtaan si ay ilmahaaga iyo qoyskaaga u kaalmeeyaan

- Waxa aad adiga iyo qoyskaaga sameyn kartaan oo aad xaaladda ku hagaajin kartaan
- In uu guddoomiyaha hubin doono inuu qof walba yaqaan waxa laga filaayo

Yaa ogaan doona in uu ilmaha yahay mid qorshe ilmo badbaadin ah loo dejiyey?
Wax asturaada aad bay muhiim u tahay, guddoonka kullanka ayaa dadka jooga tan xusuusin doona. Aad baan uga dadaalnaa hubinta in dadka u baahan ay ogaadaan, si ay adiga iyo cunugaaga indin kaalmeyaan baa warka loo siiyaa.

**<u>Maxaa xigga oo dhacaya?</u>**
Haddii qorshe badbaadin Ilmo la dejiyo koox dad ah, oo kooxda dhexe la dhaho ayaa kula kulmaya si loo hubiyo in uu qof walba sameeyo wixii uu qorshaha ku ogolaadey iyo in uu cunugaaga nabad qabo oo si haboon loo daryeelo. Saddex bil ka dib ayaa la qaban doonaa kullan kale si loo eego inuu cunuggaga u sii baahan yahay qorsho badbaadin iyo haddii ay sidaas tahay in uu wax ka bedel u baahan yahay iyo in kale. Haddii aadan kullanka imaan laga qorey baad heli doontaa. Social Worker-ka ilmahaaga ayaa kullanka ka dib sida suurtogalka ah ee ugu dhaqsi badan go’aanada kaala hadli doona.

**<u>Cunugeyga meesha ma joogi doonaa?</u>**
Cunugaaga/caruurtaada social worker-kooda ayaa ka fikiri doonaa inay fiican tahay inuu cunugaaga kullanka ka soo qeybgalo iyo in kale. Haddii uu rabo in uu yimaado oo aan dhamaanteena isku waafaqno inuu yimaado, waxaa lagu marti-qaadi doonaa in uu kullanka oo idil ama qeyb ka mid ah ka qeybqaato.

**<u>Yaa kullanka gudoominaya?</u>**
Kullanka waxaa gudoominaya Gudoomiye Madaxbanaan oo aan ka qeyb qaadan baaritaanka ilmo badbaadinta ama maareynta shaqaalaha hawsha wada. Gudoomiyaha ayaa kullanka ka hor kula soo xiriiri doona, isagaas/iyadaas, ayaa kuu sharxi doona/doonta sida uu kullan u socon doono kaagana jawaabaya wixii su’aalo ama welwelsan ah ee aad qabto.

**<u>Waqti intee la eg buu soconayaa?</u>**

Saadaalinta inta uu kulan walba socon doono waa ay adag tahay laakiin inta badan kullanka hore (bilowga ah) waxa uu qaataa saacad iyo bar ilaa 2 saacadood. Kullanada wax dib-u-eegista waqtigooda caadi ahaan intan wuu ka yar yahay.

**Maxaa goobta kullanka ka dhacaya?**

Kullanka Ilmo Badbaadinta waxa uu ku soconayaa ajenda degsan si ay qof walba ugu cadaato wax ku saabsan

- Eedeymaha, dhacdada ama welwelka jira ee in wax baaro dhaliyey.
- Wax baarinaanada la soo sameeyey iyo waxa ay muujiyeen.
- Wixii macluumaad dheeraad ah ee kale
- Nooca halista cunugaaga ku soo wajahan
-

Waxa uu gudoomiyaha qof walba, oo adna ku jirto, siin doonaa fursad uu ku hadlo uuna su'aalo ku weydiiyo. Waxaa lagu siin doonaa fursad aad fikradahaaga uga dhiibato wax walba oo lagaa sheegey. Waa ay dhici karta inay jiraan waxyaabo kullanka looga hadlayo oo, sababo jira awgood, la asturo. Goorahan adiga iyo taageerahaaga waxaa la idin dhihi doonaa qolka ka baxa, caadi ahaan gudoomiyaha ayaa ku sii ogeysiin doona haddii ay u badan tahay inay tan dhaceyso.

**Muxuu Kullan Ilmo Badbaadin go'aamin karaa?**

Xubnaha Kullanka Ilmo Badbaadinta ayaa go'aamin doona in uu cunuga halis daran ugu jiro in ay dhib soo gaarto iyo in ay tahay in loo sameeyo ' qorshe ilmo badbaadin wakaalad badan ah'.

Gudoomiyaha ayaa go'aamin doona in halista jirta ee ilmaha dhibta ku soo gaari karto lagu sheegi karo in ay tahay 'halis ku takri-fal jismi ahaaneed', ku takri-fal galmo ahaaneed, ku takri-fal niyad ahaaneed, ama dayacaad. Haddii uu kullanka go'aamiyo inuusan cunuga qorshe badbaadin u baahneyn waxaa la dareemi karaa inuu cunugaaga ka faa'ideysan karo taageero dheeraad ah oo loo yaqaan Qorshaha Ilmo Adeeg u Baahan.

**Waa maxay Qorshaha Ilmo Badbaadinta?**

Haddii ay xubnaha Kullanka Ilmo Badbaadinta go'aamiyaan inuu cunugaaga halis daran ugu jiro dhib soo gaarto, waxa ay sameynayaan qorshe badbaadin oo dejiya waxa la sameynayo si loo hubiyo in uu nabad qabo oo si haboon loo daryeelo.

# Ajendaha Kullanka Ilmo Badbaadinta

- 
- **Isbarasho, ujeedo iyo cudur daarasho raali gelin ahaaneed**
- **Sababta kullanka loo qabanayo***)*
- **Bayaaninta Halista Jirta iyo goolka nabad-qabka la higsanayo**
- **Su'aalaha Shabakada** (ayna tahay in lagu soo daro qaabka wada-xiriirka qoyska 'genogram'*)*
- **Qaabeynta**: (Waxa aan ka welwelsan nahay, waxa si wacan u shaqeynaya, nabad-qabka iyo waxyaabaha wax sii adkeeya)
- **Dib-u-eegista qorshaha ilmo badbaadinta iyo shaqada kooxda dhexe.** *Haddii u kullan wax dib-u-eegis yahay.*
- **Qeybta wax asturaada** *ama kullanka bilowgiisa amase inta in ka mid ah lagu jiro.*
- **Wax miisaamidda**–
- **Waxa xigga ee loo baahan yahay inay marka xiggta dhacaan.**
- **Xariiqmaha wax lagu salleynayo (Bottom Lines**)
- **Cabirka waqtiga.**
- **Yaa hawsha qorshaha ku hawlan***:*
- **Qorshaha Nabad-qabka/Xeerarka qorshaha**
- **Wax u qorsheynta wax ka qabadka waxyaabaha aan la filleyn**
- **Diiwaangelinta iyo Soo Bandhigidda qorshaha**
- **Qorshaha Ujeedooyinka Nabad-qabka**
- **Go'aanka iyo qeybtiisa**
- **Xubnaha kooxda dhexe**
- **Waqtiga, Taariikhda iyo goobta kullanka wax dib-u-eegista**.